



Markuu wayso qaadanayo midkiin biyaha sankiisa haku qaado oo hadana ha soo firdhiyo, qofka dhagax ku istinjooodana witr ha ka dhigo

Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Rasuulka ka wariyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: "Markuu wayso qaadanayo midkiin biyaha sankiisa haku qaado oo hadana ha soo firdhiyo, qofka dhagax ku istinjooodana witr ha ka dhigo, markuu midkiin hurdada ka tooso ha dhaqo gacmihiisa intaanu biyaha waysada gelin, waayo ma oga midkiin halka ay gacantiisu bariday", imaam Muslim ayaa isna sidan u wariyey: "markuu midkiin tooso yaanu gelin gacantiisa weelka ilaa uu saddex jeer uu dhaqo, waayo ma oga halkay gacantiisu bariday."

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Muslim.]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey qaar ka mida axkaanta dahaarada, waxaana ka mida: Midka 1aad: qofki waysaysanaya waa inuu inuu biyaha sanku ku jiido, hadana neefta soo raaciyo oo soo firdhiyo. Midka 2aad: qofkii doonaya inuu isaga nadiifiyo najaasada ka soo baxaysa isaga waxaan biyo ahayn sida dhagxaanta iyo wixii la mida, wuxuu isku nadiifinayaa tirsi kinsi ah oo ugu yaraan ah sadex ugu badnaan wixii tirtiraya najaasada meeshana nadiifinaya. Midka 3aad: qofka ka toosa hurdada habeenka gacantiisa galinmaayo weelka markuu wayso qaadanayo ilaa uu gacantiisa ku dhaqdo weelka dibadiisa, waayo ma oga halkay gacantiisu bariday, kama aamin aha in gacantiisu najaaso taabatay, waxaana dhici kara inuu shaydaan ku ciyaaray, oo uu saaray waxyaabo dadka dhibaya ama biyaha xumaynaya.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3033>

